

## Tilmaamaha Cimilada Xilliga Jiilaalka & Macluumaadka

Haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah inta lagu jiro saacadaha iskuulka, ama kiisaska isbeddelada la xiriira cimilada ee maalinta iskuulka, waxaa muhiim ah in la ogaado halka laga helo macluumaad sax ah oo cusubna ah. Markaan go'aamineyno in la xiro ama dib loo dhigo iskuulka xaaladaha cimilada darteed, waxaan baaraynaa dhacdo kasta oo cimilo oo ku saleysan xaalad- xaalad ahaan. Subaxa hore, haddii cimiladu sababto in iskuulka la joojiyo ama dib loo dhigo, go'aanka waxaa la gaarayaa 5:30 a.m, xiriirka warka Isgaarsiinta wuxuu bilaabmaa isla marka go'aanka la gaaro. Waatan sida aad u ogaankarto xaaladaha degdegga ah ee saameyn ku yeelan kara Iskuulada Dadweynaha ee Shakopee:

- Wicitaan taleefan otomaatig ah iyo ogeysiisyo iimeelka: xiritaanka ama daahitaannada Skuulka waxaa lagu soo gudbiyaa adeegga taleefanka otomaatiga ah iyo iimeelka kumbuyuutarka.
- Fadlan hubso in macluumaadkaaga xiriirka ee skuulka hayo inuu saxsanyahay si loo hubiyo inaad ka hesho ogeysiisyo muhiim ah degmada.
- Eeg [boggayaga](#) internetka. Ogeysiiska xidhitaanka iskuulka , bilowga dambe ama ka saarida goor hore waxay ka muuqan doontaa boggayaga guriga isla marka go'aanka la gaaro.
- Nagala soco Twitter iyo Facebook.
- War bixinta Isbadalka maalinta skuulka ee sababtay cimilada darteed, waxay farriimaha ka soo bixi doonaan xarumaha telefishanka, kuwaa soo ah WCCO, KSTP, FOX 9, iyo KARE 11. Waxaan la xiriirnaa idaacadaha isla marka go'aanka la gaaro, laakiin awood uma lahin waxtiga ay farriintu telefishenka laga soo dayn.
- Khadka Tooska ah ee Degdegga ah: Wac 952-496-888.

### Xusuusin muhiim ah:

- Maalmaha waxbarashada ee iskuxiran (CoLD): Tani waa fursad lagu fidiyo waxbarashada ka baxsan fasalka. Dhacdada waxaan haysanaa ka joojinta iskuulka cimilada oo xun awgeed ama xaalad deg deg ah oo aan la fileynin, Maalmaha barashada ee Iskuxiran waxay naga caawineysaa inaan ka soo baxno shuruudaha saacadaha waxbarashadeena. Halkan [guji](#) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.
- Ciyaartoyda ardaydu waa inay raadiyaan war isgaadhsiin ka soo baxay tababarayaasha iyo xafiiska waxqabadka ee ku saabsan bal in tobabarada ciyaaraha in la joojiyo ama dib loo dhigo. Xafiiska waxqabadka ayaa sidoo kale ku dhajin doona cusboonaysiinta bogagga warbaahinta bulshada, websaydhka iyo, haddii iskuulka leeyahay daaqadaha xafiiskiisa waxka lagu dhajiyo.
- Marka cimilo xun ay saamayso maalin iskuuladka caadiga ah, hawlaha maalinlaha ah ee Waxbarshada Bulshada ama fasalada si dhakhso ku kulma iskuulka kadib ayaa sidoo kale la joojinayaa. Hawlaha fiidnimada waa la qaban karaa haddii horumar weyn laga gaaro xaaladaha cimilada. Haday Xaaladdaas oo kale dhacdo, kaqeybgalayaashu waxaa la soo xiriiri doono kuwa Waxbarashada Bulshada u qaabilsan, waxay sheegi doonaan heerka fasalka.

### Skuulka Hore ee caruurta/ ECFE / PACE:

- Haddii Skuulka dib loo dhigo 2 saacadood, fasalada iskuulka hore ee caruurta yar-yar // ECFE fasalada waa la joojinayaa.
- Haddii iskuulka dib loo dhigo 2 saacadood, dhammaan fasallada galabnimada (PACE, preschool, ECFE) iyo fasallada fiidka ayaa loo qaban doonaa sidii loogu talagalay.
- Haddii ay dhacdo 2 saac oo sii-dayn hore ah, fasaxa galaaska / ECFE / PACE fasalada waa la baabi'in doonaa.
- Dhacdada 2 saac oo daahida bilowga ah, Fasalka Maalin buuxda oo Afarta ah ayaa wali soo warbixin doona oo u hogaansan doona jadwalka wax laga badalay, kaasoo ah 11:00 subaxnimo ilaa 3:00 galabnimo.
- Haddii iskuulka loo xiro cimilo darteed, ka dib barnaamijka DHAMMAAN ee Xarunta Dhexe ee Qoyska waa la joojinayaa.

YMCA:

Haddii ay dhacdo isbaddal la xiriira cimilada, fadlan ka raadi isgaarsiinta YMCA macluumaadka la xiriira dib-u-dhaca iyo / ama baajinta Skuulka. Fadlan halkaan [riix](#) si aad u aragto websaydhka YMCA wixii macluumaad dheeri ah.

*Go'aanka lagu xirayo iskuulka wuxuu ku saleysan yahay xaaladaha wadada iyo saadaasha hawada. Muhiimadeena koowaad waa badbaadada ardayda. Waalidku had iyo jeer waxay leeyihiin hordhac ah inay carruurta ku hayaan guriga ama inay ka soo qaadaan carruurta Skuulka haddii qiimeyntooda xaaladda cimilada ay ka duwan tahay degmada Skuulka.*